

*Isticmaalidda buuxda (USCRI) ee
manhajka mustaqbalka, booqo bogga
www.refugees.org*

**USCRI
MUSTAQBALK
ISTICMAALKA BANGIGA**

DOORASHADA ADEEGYADA UGU WANAAGSAN

Weydii su'aalahan markaad go'aansaneysid u
isticmaalidda elegtrooniga bangiga.

1. Miyaan bixin doonaa lacag dheeraad ah si
aan u isticmaalo makinadda lacagta la gala
boxo ee ATM-ka?
2. Miyaa la igu soo dalacayaa lacag dheeraad
ah isticmaalidda makinadda lacagta la gala
baxo ee ATM—ka oo aanan laga laheyn
bangigeeyga?
3. Bangigeeyga isticmaalidda elegtrooniga ee
interneetka ma lacag baa?

GOOR DHOW BUU IMANAYAA

Dhawaan, waxaad awoodi doontaa inaad
amaahda IOM-da ku bixiso shabakadda
internetka. Waxaa kuu baaqan doonta lacag,
haddii aad iibsato jecga la yiraahdo (money
order). Booqo boggan www.refugees.org.

*U isticmaalida Elegtrooniga
Bangiga*



USCRI

1717 Massachusetts Ave, NW #200
Washington DC, 20036
Phone 202.797.2105
Fax 202.347.7177

MUSTAQBALK ISTICMAALIDA BANGIGA

Waa maxey isticmaalka elektarooniga?

Isticmaalka bangiga elektarooniga waa lacagta elektaroonig ahaan loo wareejiyo.

Isticmaalka bangiga elektarooniga waxaa kale oo loo yaqaanaa “elektarooniga ku dhaqaajinta miisaaniyadda” (EFT).

Farsamada combiyuutarada iyo elektarooniga ayaa lagu bedelay jeegyada iyo waraaqadaha. “EFT”s ayaa la bilaabay kaarar, ama nambaro kuu ogolaanayo, iyo kuwaad u ogolaato, isticmaalka koontadaada.

Bangiga electrooniga wuu noqon karaa mid lagu wareero, sababtoo ah maad arkeysid lacagta.

MIIYUU ISTICMAALKEYGA XAFIDAN YAHAY?

Haa. Falka Sanduuqa Elektarooniga ee Xawilaadda(1978) waa sharci ka difaacaya macaamiisha oo isticmaalaya nooc walba oo ka isticmaalka elektrooniga bangiga khasaarooyin qaarkood .

MIIYUU AQOONSIGEYGA XAFIDAN YAHEY?

Haa. Waxaad u baahan tahay nambor cadeyn ah oo kuu khaas ah sida PIN.

SABABTA WAA MAXEY OO AAN U ISTICMAALAYAA BANGIGA ELEGTROONIGIISA?

Waa suurogal inaad isticmaaleysid bangiga elektarooniga.

- lacag baa kuugu baaqaneyso sarifka jeegagaaga.
- Si deg deg ah baad ku helayaa lacagtaada.
- Si deg deg ah baad ku heli kartaa inta lacag ah ee kuugu jirta koontadaada.

- Lacag badanna uma aad baahnid inaad jeebka ku sidatid.

Qarso Pin nambarkaaga! Hala qaybsanin PIN nambarkaaga qof aadan u ogoleyn inuu arko koontadaada.

NOOC KA MID AH BANGIGA ELEGTROONIGIISA.

Makiinadda Otomaaliga u xisaabisa (ATM) : waa makiino oo kuu ogolaaneyso inaad bangiga isticmaasho. Waad lacag kala bixi kartaa makiinadda ama aad ku ridi kartaa .

Keydin Toos ah (Direct Deposit): Jeegaaga shaqada si toos ah baad ugu shubi kartaa koontadaada furan(checking) iyo Dhigaalka(savings). Intaad gacanta ku soo qaadan laheyd jeegaaga shaqada, Waxaa lagu soo dirayaa jeega dabadiisa oo keliya.

Kaarka keydka (Debit Card): karaka bangiga ayaa bedelay jeega la qoro ama caddaan. Kaaraka bangiga wax baad ku iibsan kartaa. Karaka wuxuu ku xiran yahay koobtadaada furan checking-ka. Kaarka keydka wuxuu moqon karaa kaarkaaga ATM ka.

U isticmaalidda internetka Bangiga: Waad ku bixin kartaa biiil-kaaga shabakadda internetka koontadaada waad kala socon kartaa 24 kii saac.

Kaarar qiimo xadidan ku jiraan (pre-paid cards):

Kaaraka lacagta xadidan lagu shubo wuxuu leeyahay qiimo gaar ah. Maad ka isticmaali kartid in ka badan qiimahiisa. Manaafacaadyada dowlada qaarkood waxaa lagu bixiyaa kaarka lacagta xadidan ku jirta (Wareejinta Manaafacaadyada Elektarooniga EBT). Barnaamijyada (food stamp) ka waxaa lagu diraa. (EBT).

Iska jir! Ha kala bixin lacag ka badan inta baniga kuugu jirta! Waxaa laguugu soo dalici doonaa lacag ganaax ah. Lacagta ganaaxa ah waxey noqon kartaa lacag badan. Kala wareejin lacag waqti bey qaadan kartaa. Koontadaada bangiga wey ku tusi kartaa lacag ka badan lacagta runtii kuugu hartey.

ARIMO MUHIIM AH IN LA OGAADO

- Qarso PIN nambarkaaga.
- Markaad sameysaneysid PIN nambarkaaga, Ka kaaftoon nambarda sida waqtiga aad dhalatey.
- Weligaa ha ku qorin PIN nambarkaaga karaka bangiga ama ATM kaaga.
- Si toos ugu shubida jeega shaqada koontada, waa lacag la'aan.
- Waraaqahaaga isticmaalka bangiga ururso, Dhamaadka bisha marka lagu soo diro sidaad u isticmaashey, Isu fiiri labada warqadood.
- Haddii uu kaa lumo karaka bangiga, Si deg deg ah ula soo xiriir bangigaaga. Lacagtaada wey kuu soo celinayaan.